

Diyaar  
ma tahay?

**Badbaadada ugu roon waa  
adigoo yaqaana sidii aad  
yeeli laheyd haddii halis  
deg-deg ahi timaaddo.**

Ottawa



Emergency Preparedness  
Protection civile  
الاستعداد للطوارئ  
Diyaarsanaanta deg-deg ah

## Liiska Sanduuqa Diyaargarowga Halista Deg-degga ah

Sanduuqa diyaargarowga halista deg-degga ah waxuu kaa caawimi doonaa badbaadinta naftaada iyo tan qoyskaagaba. Si fudud oo dhaqso ah, qiimo badanna kaaga baxeynin ayaad u diyaarsan kartaa sanduuqan oo laga yaabo in uu naftaada badbaadsho.

Sanduuqaaga diyaargarowga halista deg-degga ah waa in ay ku jiraan alaabo ama saad ku filan naftaada iyo tan ehelkaagaba ugu yaraan muddo seddex maalmood ah idinkoo gurigiinna jooga.

Alaabaha ama saadka aad u baahantahay ku soo wada uruuri sanduuq si fudud loo xambaaran karo, kuna xaree meel si fudud oo dhaqso ah loo gaaro.

### Sanduuqaaga diyaargarowga halista deg-degga ah waa in ay ku jiraan:

- Raadiyo ku shaqeeyo batari
- Tooshash iyo isbeer badan oo nalalkiisa ah
- Batariyayaal badan
- Lacag kaash ah iyo jeegagga lagu socdaalo
- Middida jeebka
- Xarig
- Badeel
- Dab damiye yar, nooca ABC-ga
- Teendho
- Bustayaal iyo jawaannada jifka
- Bacda wax lagu dado
- Shumacyo badan iyo tarraqa ama dabka sigaarka
- Furaha baabuurka ee isbeerka kuu ah
- Warqadaha muhiimka ah (eeg liiska)
- Cunto iyo biyaha dhalada ku jira (eeg liiska)
- Dhar iyo kabo (qof walba ugu tala gal hal bedel oo dhar ah; carruurta u badi)
- Waraaqaha musqusha iyo alaabta kale ee shaqsiyadeed
- Sanduuqa gurmada deg-degga ah (eeg liiska)
- Boorsada dhabarka lagu qaato.
- Bacda qashinka iyo xargaha lagu xiro
- Jeermi dilayaal, Jigta Kaloriinta (chlorine bleach)
- Shiidaal dheeri ah oo aad ugu talagashay baabuurka. Shiidaalka ku xaree meel ammaan ah iyo weel loogu talagalay; ha xareysan cadad aad u badan.
- Buugga isu diyaarinta halista deg degga ku timaadda. Buugga ugu wanaagsan waa buugga Ottawa cinwaankiisu yahay "Together We're Prepared" ("Si Wadajir ah Ayaan Diyaar u Nahay"). Buuggaas waxaad ka heli kartaa Laanta Maareynta Halista Deg-degga ah ee xafiiska magaalada ama bogga internetka ee ottawa.ca
- Khariidadda magaalada iyo jiheeye.
- Kashawiito nooca aad marna yareyn karto marna weyneyn karto si aad ugu xir xirto tuubbooyinka gaaska guriga ku jira iyo biyaha.
- Firimbi (laga yaabo in aad u baahatid in aad ku qaylo dhaansatid)
- Turubka, ciyaaraha carruurta ku ciyaarto, warqado iyo qalimaanta qoriga ah.

Si aad u hesho xog dheeri ah oo ku saabsan waxa magaaladu ay sameyneyso, iyo waxa aad adiga qaban kartid si aad diyaar u ahaato, waxaad soo booqataa bogga internetka ee ottawa.ca, ama waxaad wacdaa 580-2400 amaba la tasho Bogagga Gud-guduudan ee buugga taleefoonnada. Shabakadda internetka ee magaaladan waa meesha ugu wacan ee aad ka heli karto xog warran ku saabsan u diyaarsanaanta halista deg-degga ku timaadda oo ku filan adiga iyo dhammaan ehelkaaga oo dhan.

580-2400 | 580-2401

ottawa.ca